Casharka 12

1. Markii Shayddaanka uu u yimid inuu xaawo khiyaaneeyo, sidee buu isku qariyey?
-Wuxuu isku qariyey abeesada dhexdeeda.

2. Miyaa Xaawo garatay in waxa la hadlaya uu ahaa Shayddaanka?
-Maya.

3. Maxaa Shayddaanku isugu qariyey abeesada dhexdeeda?
-Waayo Shayddaanka wuxuu doonayey inuu dabin u dhigo Xaawo.
-Waayo wuxuu Shayddaanku doonayey inuu khiyaameeyo Xaawo.
-Waayo Shayddaanku wuxuu doonayey inuu burburiyo Xaawo.

4. Miyaa Shayddaanku isku dayaa inuu dibindaabyo iyo khiyaamo u dhigo dadka?
-Haa.

5. Sidee baa Shayddaanku isugu taxluujiyaa inuu dibin-daabyo iyo khiyaamo kula shaqaysto dadka?
-Marka ugu horraysa, Shayddaanku wuxuu la hadlaa maankeenna.
-Marka labaad, Shayddaanku wuxuu inagala dhex hadlaa qof kale.
-Marka saddexaad, Shayddaanku wuxuu inagala dhex hadlaa jinniyada.

6. Maxaa Ilaah Aadan u sheegay inay ku dhacayaan haddii ay cunaan Geedka Wanaagga aqoonka iyo Xumaanta?
-Way dhimanayaan.



7. Maxaa Shayddaanku Xaawo u sheegay inay ku dhacayaan haddii ay cunaan geedka aqoonta Wanaagga iyo Xumaanta?
-Inaanay dhimanaynin.
-Wuxuu u sheegay inay Ilaah la mid noqon doonaan.

8. Muxuu Shayddaanku Ilaah ugu yeerayey?
-Beenaale.

9. Kaddib markii Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen, maxay sameeyeen markii ay arkeen inay qaawanaayeen?
-Waxay calalo ka samaysteen caleenta.

10. Kaddib markii Aadan iyo Xaawo dembaabeen, maxay sameeyeen markii ay maqleen in Ilaah imanayo inuu arko?
-Way iska qariyeen.

11. Ma suuragal baa in qofi Ilaah iska qariyo?
-Maya.

12. Yuu Shayddaanku neceb yahay?
-Shayddaanku wuxuu neceb yahay Ilaah iyo dadka oo dhan.

13. Miyaa Shayddaanku doonayaainaad maqasho Hadallada Ilaah?
-Maya.

14. Muxuusan Shayddaanku u doonaynin inaad maqasho Hadallada Ilaah?
-Waayo Shayddaanku wuxuu neceb yahay dadka ood han, oo wuxuu doonayaa in dadka lagu guro Harada dabku ka qaxmayo oo weyn.

-Maxaa Ilaah sameeyey kaddib markii Aadan iyo Xaawo ay addeeci waayeen?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:9

9- Laakiin Ilaah wuxuu u yeeray Aadan oo wuxuu ku yiri, Halkee baad ku maqnayd?

-Kaddib markii Aadan iyo Xaawo ay Ilaah addeeci waayeen, Ilaah wuxuu u yeeray Aadan.

-Miyaa Ilaah u yeeray Aadan iyadoo ay ugu wacan tahay inaanu garanaynin halkii Aadan joogay?
-Maya.

-Ilaah wuxuu garanayaa wax waliba.
-Ilaah wax waliba wuu arkaa.
-Ma jiro qof Ilaah iska qarin kara.

-Maxaa Ilaah Aadan ugu yeeray?

-Ilaah wxuu doonayey in Aadan u yimaado oo uu qirto dembigiisa.
-Ilaah wuxuu doonayey in Aadan isaga u yimaado oo uu qirto inuu Ilaah adeeci waayey.

-Ilaah wuxuu doonayey in Aadan Isaga u yimaado oo uu qirto inuu maqlay Shayddaanka.

-Muxuu Ilaah Aadan ugu yeeri waayey?
-Waayo Ilaah wuxuu abuuray Aadan.
-Waayo Aadan wuxuu lahaa Ilaah.



-Waayo wuxuu Ilaah Aadan u abuuray inuu Isaga addeeco.

-Maxaa Ilaah dadka ood han ugu yeerayaa?

-Waayo Ilaah wuxuu abuuray dadka oo dhan.
-Waayo dadka oo dhaniba Ilaah bay leeyihiin.
-Waayo Ilaah wuxuu dadka ood han u abuuray inay isaga addeecaan.

-Ilaah weli isma beddelin.
-Ilaah weli wuxuu u yeerayaa dadka maanta.

-Sidee baa Ilaah dadka maanta ugu yeerayaa?

-Marka kowaad Ilaah wuxuu dadka ugu yeeraa inay arkaan sancadii gacantiisa.

-Waxaa waxyaabaha Ilaah abuuray ina tusayaan ama inoo muujinayaan inuu Ilaah jiro, oo Ilaah wax waliba sameeyey, oo Ilaah doonayo inuu innaga ina maqlo.

-Tan labaad, Ilaah wuxuu dadka ugu yeeraa kitaabkiisa.

-Kitaabka Ilaah waa farriinta Ilaah adiga kuu soo qoray.
-Kitaabka Ilaah waa hadalka adiga uu kula hadlayo.

-Maxaa Aadan yiri markii Ilaah u yeeray isaga?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:10

10-Isagiina wuxuu yidhi, Codkaagaan beerta ka dhex maqlay, waanan cabsaday, maxaa yeelay, waan qaawanaa; oo

waan isqariyey.

-Maxaa Aadan iyo Xaawo Ilaah uga cabsadeen?
-Waayo Ilaah bay addeeci waayeen.

-Waxaa halkan yaalla sharraxaad:

-Haddii nin beer uu iska leeyahay soo aado, oo uu arko in beertiisii tuug soo galay, oo uu xadayo gallaydii, miyaa tuuggu is-qarinayaa?
-Haa.

-Waayo Aadan iyo Xaawo way debaabeen oo Ilaah bay addeeci waayeen, oo weliba Ilaah bay iska qariyeen.

-Maxaa markaa Ilaah ku leeyahay Aadan?

Bal aan akhrinno Bilowgii 3:11

11-Kolkaasuu ku yidhi, Yaa kuu sheegay inaad qaawan tahay? Miyaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray inaadan wax ka cunin?

-Maxaa Ilaah Aadan u weyddiinayaa inuu cuanay miraha Geedka?
-Miyaanu Ilaah garanaynin in Aadan cunay miraha?
-Haa.

-Maxaa Ilaah u weyddiinayaa Aadan haddii uu cunay miraha iyo haddii kale?

-Ilaah wuxuu doonayaa in Aadan u yimaado isaga, oo uu qirto dembigiisa.



-Ilaah wuxuu doonayaa in Aadan u yimaado oo uu qirto inuu Isaga addeeci waayey.

-Ilaah wuxuu doonayaa in Aadan u yimaado Isaga oo uu qirto inuu hadalkii Shayddaanka maqlay.

-Maxaa Ilaah Aadan su'aasha u weyddiinayaa?

-Waayo Ilaah waa kan abuuray dadka oo dhan, Ilaah su'aalo wuu weyddiin karaa dadka oo dhan.

-Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa Ilaah su'aalo weyddiin doonaa dadka oo dhan, dadka ood hanna waa inay u jawaabaa Ilaah.

-Ilaah wuxuu su'aalo weyddiiyey Aadan, muxuuse Aadan Ilaah ugu jawaabay?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:12-13

12-Ninkiina wuxuu yidhi, Naagtii aad i siisay inay ila joogto ayaa geedkii wax iga siisay, oo anna waan cunay,
13-Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu naagtii ku yidhi, Waa maxay waxan aad samaysay? Naagiina waxay tidhi, Abeesadaa i khiyaanaysay oo anna waan cunay.

-Aadan wuxuu eedeeyey Xaawo, Xaawana waxay eedaysay abeesadii.
-Ilaah horey buu u garanayey runta.
-Runtu Ilaah kama qarsoona.

-Maxaa qofka isagoo wax xadaya la aqbto uu sameeyaa?
-Qof kale ayuu eedeeyaa.

-Innagu dadka waannu khiyaamayn karnaa iyadoo qof kale aynu dembiyadeenna u saarinayno.

-Balse Ilaah been uma sheegi karno iyadoo ayn dad kale eedaynayno.

-Ilaah wuxuu mar waliba garanayaa runta.
-Ilaah wuxuu mar waliba ciqaabaa kuwa diida inay isaga adeecaan.
-Ilaah wuxuu mar waliba ciqaabaa kuwa dembaaba.

-Ugu horraynta, Ilaah wuxuu ciqaabay abeesadii.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:14

14-Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu abeesadii ku yidhi, Waxan aad samaysay aawadiis waad ku habaaran tahay xoolaha oodhan, iyo dugaag kasta oo duurka jooga, waxaanad ku socon doontaa boggaaga, ciid baanad cuni doontaa maalmaha cimrigaaga oo dhan.

-Sidee baa Ilaah u ciqaabay abeesada.

-Abeesada waxaa lagu ciqaabay ama xukumay inay xabadka iyo caloosha ku gurguurato.

-Ilaah wuxuu ciqaabay abeesada, laakiin muxuu u ciqaabay?

-Abeesadu lama hadlin Xaawo.
-Shayddaanka ayaa Xaaw la hadlay.

-Muxuu haddaba Ilaah u ciqaabay Abeesada?
-Waayo Ilaah waa inuu ciqaab dusha ka saaro dembiga oodhan.



-Waayo Shayddaanka ayaa wuxuu isticmaalay abeesada si ay ku dembaabto.

-Ilaah wuxuu ciqaabay dembiga oo dhan.

-Tan labaad, Ilaah wuxuu ciqaabay Xaawo.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:16

16-Naagtiina wuxuu ku yidhi, Dhibtaada iyo wallaacaaga aad baan u badin doonaa; oo dhib baad carruur ku dhali doontaa; oo waxay doonistaadu ahaan doonaa ninkaaga, wuuna kuu talin doonaa.

-Sidee baa Ilaah Xaawo u ciqaabay?
-Xaawo waxay ilmo ku dhali doontaa dhib iyo xanuun.

-Tan saddexaad, Ilaah wuxuu ciqaabay Aadan.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:17-19

17-Aadanna wuxuu ku yidhi, Codkii naagtaadaad maqashay oo waxaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray, anigoo leh, Waa inaadan waxba ka cunin, sidaas daraaddeed dhulku waa habaaran yahay adiga aawadaa; maalmaha cimrigaaga oo dhan hdibaataad wax kaga cuni doontaa.
18-Qodxan iyo yamaarugna waa kaaga oo bixi doonaan, waxaanad cuni doontaa geedaha yaryar oo duurka.
19-Wejigaagoo dhididsan baad wax cuni doontaa, ilaa aad dhulka ku noqotid; maxaa yeelay, dhulkaa lagaa qaaday; waayo, ciid baad tahay, ciid baadna ku noqon doontaa.

-Sidee baa Ilaah u ciqaabay Aadan?

-Aadan wuxuu beerayaa dhulka isagoo wejigiisuna dhididsan yahay, waxaana dhulka uga soo baxaya xoogaa badar ah.

-Ciqaabta Aadanwaa mid saran dadka ood han.

-Imminka, dadka ood han waxay dhulka beeraan iyadoo wejigoodu uu dhididsan yahay, waxaana uga soo go'a badar aan badnayn.

-Sidee kale ayaa Ilaah u ciqaabay Aadan?
-Ilaah wuxuu inkaaray dhulka ood han.

-Waa maxay calaamadaha muujinaya in Ilaah dhulka inkaaray?

-Waxaa dhulka ka baxa geedo qodxan leh iyo dhalatooyin, la soo baxa wixii aynu beeranno.

-Waxaa dunida ka jira abaaro, iyo fatahaad.
-Waxaa kaloo dhulka ku badan dhir sun ah iyo weliba halaqa.

-Xamaaratadu waxay qaniintaa dadka.

-Dadkuna waa ina y si adag u shaqeeyaan
-Dadku way jirradaan.
-Dadku weliba way dhintaan.

-Waayo Aadan iyo Xaawo waxay adeeci waayeen Ilaah, oo dhulkana waxaa ku soo degay habaar.

-Waayo Aadan iyo Xaawo ayaa Ilaah adeeci waayey, oo dhulkiina waxaa ku batay sharka.



-Waayo Aadan iyo Xaawo ayaa adeeci waayey Ilaah, ood adkii oodhan way wada dhinteen.

-Ciqaabta Ilaah u dejiyey adeecis-darrada waa mid joogta ah.
-Ciqaabta Ilaah u dhigay dembigana waa dhimashada weligeed ah.

-Wax yar kaddib markii Ilaah ciqaab dusha ka saaray Aadan iyo Xaawo, muxuu Ilaah iyaga ka ballan-qaaday?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:15

15-Oo colaad baan idin dhex dhigi doonaa adiga iyo naagta, iyo farcankaaga iyo farcankeeda; oo maxaxaaguu burburin doonaaadiguna cedhibtiisaad burburin doontaa.

-Wax yar kaddib markii Ilaah ciqaab dusha ka saaray Aadan iyo Xaawo, Ilaah wuxuu u ballanqaaday iyaga Badbaadiye.

-Muxuu Badbaadiyuhu samayn doonaa?
-Badbaadiyuhu wuxuu dadka ka badbaadin doonaa awoodda dembiga.

-Badbaadiyuhu wuxuu dadka ka samatabbixin doonaa awoodda dhimashada.

-Badbaadiyuhu wuxuu dadka ka badbaadin doonaa awoodda dhimashada.

-Badbaadiyuhu wuxuu la diriri doonaa Shayddaanka.

-Shayddaanku wuxuu dhaawici doonaa Badbaadiyaha, laakiin Badbaadiyuhu wuxuu ka adkaan doonaa Shayddaanka.

-Yuu badbaadiyahaasu noqon doonaa?
-Badbaadiyuhu wuxuu noqon doonaa Wiilka ka dhalan doona gabar bigrad ah.

-Maxaa Ilaah u ballanqaaday inuu Badbaadiye u soo diro?
-Waayo Ilaah dadka ood han ayuu aad iyo aad u jecel yahay.

-Miyaa Aadan iyo Xaawo u qalmeen jacaylka Ilaah?
-Maya.
-Maxaa Aadan iyo Xaawo ay ugu qalmi waayeen jacaylka Ilaah?

-Waayo waxay addeeci waayeen Ilaah, oow axay maqleen codkii Shayddaanka.

-Maxay adeeciddarradii Aadan iyo Xaawo u qalantay?
-Waxay u qalantay dhimashada daa'imka ah.

-Aadan iyo Xaawo waxay adeeciddarradoodii ku mutaysteen dhimashada daa'imka ah.

-Balse Ilaah wuxuu iyaga ka ballanqaaday Badbaadiya iyaga samata-bixiya.

-Tusaale ayaa halkan yaalla.
-Nin dhiman raba ayaa guriga kuugu yimid.

-Waxaad u soo iibisay dawo iyo cunto.
-Markaasuu wahti dheer kula joogay.

-Ugu dambayntii wuu caafimaaday.
-Ka hor intaanu kaa tegin, ayuu kaa xaday sacaagii.



-Kaddib, ninkii baa kuugu soo noqday, isagoo qarka u saaran dhimasho.

-Mar kale ayaad u soo iibisay dawo iyo cunno.
-Mar kale ayuu haddana soo caafimaaday.

-Ninkii sacaagii kaa xaday, waa khasab inaad ciqaabto.

-Welibana, waxaad ninkaas isaga ah ku caawisay inuu haddana caafimaado.

-Markaa Aadan iyo Xaawo waxay adeecidarradoodu u qalantay dhimasho.

-Welibana Ilaah wuxuu ka ballan qaaday inuu iyaga u soo diro Badbaadiyaha, si ay u badbaadaan.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:20

20-Ninkiina wuxuu naagtiisii u bixiyey Xaawo, maxaa yeelay, waxay ahayd hooyadii waxa nool oodhan.

-Xaawo waxay ahayd naagtii ugu horraysay, iyo hooyada dadka oodhan.

-Aadan wuxuu ahaa ninkii ugu horreeyey, iyo Aabbaha dadka oo dhan.

-Dadka oo dhan waxay ka soo farcameen Aadan iyo Xaawo.

-Laakiin Ilaah wuxuu ballanqaaday inuu Badbaadiyaha sood iri doono kaasoo Shayddaanka ka adkaan doona.